



Ardayda

## Sida tan yeel/samee xagga faduusha iyo xoogsheegashada

Ahaaw **qof daacad ah**: Haddii aad aragto faduul ama xoogsheegasho u muuji taageeradaada kan loo xoogsheegtay ama la faduuliyay tusaale ahaan, adigoo ku soo daraya kooxda kan la reebay ama ka haray kooxda.

Haddii qof uu **ku faduuliyo ama kuu xoogsheegto, si dhaqso leh ugu wargeli** macallinka, maamulaha ama qof kale oo weyn oo dugsiya ka tairsan. Sidaana ayuu qofkaasi ku soo faragelin karaa.

Sidoo kale ku wargeli dadka waaweyn, haddii **qof kale la faduulinayo ama loo xoogsheeganayo**.

Sheeg, **waxa** xaaladdaasi dhacay iyo **kuwa** goob joogga ahaa.

Sidoo kale u sheeg qofka weyn, haddii aad la kulantay faduul ama xoogsheegasho xagga khadka **internetka**.

**Kaydi** caddeymaha suurtoogalka ah, sida warbaahinta arrimaha bulshada, farriin qoraal iyo farriimo kale oo imail ah.

Sidoo kale u sheeg arrinka **waalidkaa**.

### Miyaad ogeyd, in:

Dadka waaweyn ee dugsiya aay tahay, in aay wax ka qabtaan faduusha iyo xoogsheegashada.

Markaad u baahato caawimaad, **waxaad la xiriiri kartaa macallinka, maamulaha, dhaqtarka cilmi nafsiga iskuulka, shaqaalaha arrimaha bulshada, kalkaalisada amaba dhaqtarka**.

Wada hadalka waa mid la xafidi oo qarsoodi ah, waxa aad rajeyneysid iyo fikradahaagaba waa la tixgalin doonaa.

Waxaad ku wargelin kartaa faduusha dadka waaweyn ee dugsiya ka tirsan adigoo ugu diraya **warbaahinta arrimaha bulshada si farriin qoraal ah**.

Adiga waxaad **xaq u leedahay ka qeyb qaadashada** howlaha qorsheynta xeerarka dugsiya.

**Faduushu iyo xoogsheegashadu waay xanuun badan tahay. Xasuusnoow, in aad muhiim tahay oo aad qiimo ku leedahay sida aad tahay oo kale.**